

Badqabka Rakaabka Ilmaha ah

Raac tilmaamahaan si ay kaaga caawiyaan sugida amniga carruurtaada saaran gaariga.

ILMAHA KAYAR DA'DA 13 SANO WAA INAY RAACAAN KURSIGA DANBE.



KURSIGA GAARIGA EE GADAAL U JEEDA

- Ilmaha kayar 2 sano waa inay raacaan kursiga gadaal u jeeda ee gaariga.
- Marna ha saarin kursiga gaariga ee gadaal u jeeda horta kiishada hawada ee shaqeynaysa ee hore.
- Ha u adeegsan kursiga gaariga meel aad seexato oo ka baxsan gaariga.




KURSIGA GAARIGA EE HORAY U JEEDA

- Ilmaha kayar 5 sano waa inay raacaan kursiga gadaal u jeeda ama kan horey u jeeda ee gaariga oo leh suunka amaanka.
- Markasta adeegso tiir leh kursiga gaariga ee horay u jeeda - akhri kursiga gaarigaaga iyo buugaagta tusmada ee gaariga si aad u hesho xog dheeri ah.



KURSIGA KABISTA AH

- Ilmaha aan ku fadhin kursiga gaariga waa in loo dhigaa kursiga kabista ah ilaa ay 8 sano jir ka gaarayaan.
- Inta badan ilmaha ayaa u baahan kursiga kabista ah inta ay ka waynaanayaan 8 sano amaankooda awgiis.



SUUNKA KURSIGA

- Ilmaha kayar 18 sano jirka ee aan adeegsan kursiga gaariga ee aan suumanka lagu xirin ama kursiga kabista ah waa inay xirtaan suunka amaanka.
- Xaqiiji in qof kasta oo gaarigaaga saaran inuu adeegsado suunka amaanka safar kasta.

BARNAAMIJKA BADQABKA ILMAHA RAKAABKA AH

802-847-1215 AMA 802-847-9988 (Adeegyada Turjumaanka)

THE
University of Vermont
Children's Hospital